

**EUROPEAN UNION**



**Supporting the Somali New Deal**

**Qoraal Midowga Yurub**

***Qoraal ay wada jir u soo saareen safiirada Dowladaha Xubnaha ka ah Midowga Yurub kaasoo ay kaga jawaabayeen warbixinta Qaramada Midoobey ee Xoriyadda Qowlka Soomaaliya***

Nairobi, 21ka September, 2016, Midowga Yurub iyo Dowladaha xubnaha ka ahba waxaa ay ugu hambalyeneyaan Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya ee (UNSO) iyo Xafiiska Ergayga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee Qaabilsan Xaquuqul Insaanka ee (OHCHR) in ay soo saareen warbixintoodii ugu horeysay ee la xiriirta xaaladda xorriyada qowlka ama hadalka ee Soomaaliya. Midowga Yururb iyo dhamaan wadamada xubnaha ka ahba si weyn ayey u aaminsan yihiin una dhiirigalinayaan xorriyada hadalka ama qowlka. waxaana u aragnaa in ay tahay dhagax dhiga dimuquraadiyada iyo xuquuqda aasaasiga ah ee qof kasta leeyahay.

Sida ay warbixintu cadeyneys, dilka, jirdilka, faquuqinta, xariga iyo xabsiga aan shariyeesnayn, maqnaanshaha nidaam caddaaladeed oo la horgeeyo dadka la tuhmayo, iyo xariga lagula kacayo warbaahintuba waxay noqodeen falal si joogta ah uga dhaca Soomaaliya oo dhan. Waxaa aallaaba inta badan lagu saleeyaa falalkaas eedeymo la xiriira baahinta war been ah, loona cuskado sharciga benalaha ee Soomaaliya si loo ciqaabo.

Dareen weyn ayaan ka qabaan Midowga Yurub ahaan in dacwadahaas xooggodu ay yihiin kuwo aan baaritaan lagu sameynin. waxaanna u aragnaa xaalada mid waajib ka dhigeysa in la dhowra, difaaco, lana hormariyo xuquuqda madax bannaanida fikradaha dadka iyo xoriyatul qowlka, sidaa darteedna haydaha dowliaga ee ay quseyso waxaa laga dhowrayaa in ay si nidaamsan uga jawaabaan warbixinta, una baaraan eedeymaha, isla markaana in u sinnaanshaha sharcigu noqdo mid horseeda in la xaq dhowro xuquuqul insaanka.

Waxaan sidoo kale garawsanahay baahida loo qabo in la tirtiro sharciga danbiyeynaya baahinta warar aan run ahayn, lana xaqijiyo in doorka nadabad Sugidda Soomaaliyeed noqdo mid ah kor joogteyn huffan iyo tallaabooyin isla xisaabtan ah.

Midowga Yurub iyo wadamada xubnaha ka ahba waxay doonayaan in ay arkaan todobaadyada soo socda in la abuuro jawi ogolaanaya in dadku ka qayb galaan doodo la xiriira geediga dimuquraadiyada oo dhacaya, lana bixiyo damaanad in ay jirto xorriyada hadalka, xaqa sameysashada urruro iyo isku soo baxyo nabadeed. Si loo bari taaro dimuquraadiyada baahsan iyo howl laga wada qeyb qaadanayo oo loo dhan yahay.

Waxaan soo dhoweyneynaa sharuucda dhowaan la ansixiyey ee dhisida guddiga xaquuqul Insaanka, waxaana ugu baaqayanaa Dowlada Federaalka Soomaaliya in ay xaqiijiso dhismaha hayada madax bannaan sida ugu dhaqsaha badan si ay degdeg ugu dhaqaaqdo doorkeeda xassaasiga ah ee ay ku horumarineyso, kuna difaaceyso xuquuqul insaanka qof waliba leeyahay, ayna ka mid tahay xaga umadax bannaanta fikradaha.

Midowga yurub iyo wadamada xubnaha ka ahba, waxay u taagan yihiin in ay taageeraan dhaqan galinta soo jeedimaha ku cad warbixinta, waxaana ku martiqaadeynaa hayadaha dowliga ah iyo hayadaha kale ee ay quseyso in ay u adeegsadaan soo jeedimahaas qaab farsamo si ay wax uga qabtaan arrimaha aasaasiga ah ee la xiriira madax bannaanida xoriyada qowlka Soomaalia.

Dhamaad.